Xirfadaha Imtixaanka Xirfadaha Waxbarashada (MTAS)

Xisaabta Akhriska Cilmiga Sayniska

Tilmaam-bixinnada Heerka Guul-gaarista

Qoraalka waxaa dib loo saxay Juulay 2014

Minnesota Department of Education

Xirfadaha Imtixaanka Xirfadaha Waxbarashada (MTAS)

Tilmaama-bixinada Heerka Guul-gaarista

ee

Xisaabta, Fasallada 3–8 iyo11

Akhriska, Fasallada 3–8 iyo 10

Cilmiga Sayniska, Fasallada 5,8 iyo Dugsiga Sare

Wixii ku saabsan baddalidda qaabaynta kale, la xariir:

Minnesota Department of Education
Division of Statewide Testing
1500 Highway 36 West
Roseville, MN 55113-4266
Telefoonka: 651-582-8200
Fakiska: 651-582-8874
Iimaylka: mde.testing@state.mn.us

© Minnesota Department of Education
Julaay 2014

Tilman-bixinada Heerka Guul-gaarista Qiimaynada Minnesota

Dulmarka

Taxanaayaasha III ee qiimaynada Minnesota waxaa lagu saleeyay heerarka waxbarashada kuwoodi ugu damnbeeyay ee Xisaabta, Akhriska iyo Sayniska. Heerarka waxbarashada waxaa dib loo saxay si waafaqsan jadwalka lagu jaangooyay xeerka M.S. 120B.023. Laba ama saddex sano ka dib markii heeraarkaas dib loo saxay lana hirgaliyay, taxanaayaasha cusub ee qiimaynada waxay diyaar u yihiin hawlgalka maamulka. Fasalka 11 qiimaynada xisaabta waxay ahaayeen kuwa ka baxsan jaantuuskaan. Hirgalinta waxaa dib loogu dhigay si ardada dhigata fasalka 8 loogu oggolaado waqtiga la hirgaliyay heerarka cusub ee 2007 si ay u qaatan qiimaynada Xisaabta fasalka 11 ee lagu saleeyay heerarka 2003. Tilmaamaha ardaydaas intooda badan wixii ka horreeyay qiimaynta fasalka 11 waxaa lagu saleeyay heerarka 2003d. Heerarka jadwalka dib u saxidda iyo maareynta koobaad ee qiimaynada cusub waa kuwa ka muuqda Shaxda 1.

Shaxda 1: Heerarka iyo qiimaynada jadwalka dib u saxidda

Hawlqabadyada	Xisaabta	Sayniska	Farshaxanada Luqadda Ingriiska
Heerarka dib u eegista	2006–2007	2008–2009	2009–2010
Maamulka hawlgalka koobaad ee qiimaynada Taxanayaasha III	Guga 2011: Fasallada 3–8 Guga 2014: Fasalka 11	Guga 2012: Guga 5, 8 iyo Dugsiga Sare	Guga 2013: Fasallada 3–8 10 qiimaynta Akhriska

Heerarka Guul-gaarista

Iyadoo la raacayo maareynta koobaad ee qiimaynada cusub, Waaxda Waxbarashada Minnesota, waa in ay kulmisaa xeeldheerayaasha iyo hay'adaha nawaaxigu arrimuhu khusaysa si go'aan looga gaaro, heerarka loo marayo abaabulka habraaca, heerarka waxqabadka ee ardayda laga soo warbixiyay, waalidiinta iyo dugsiyada. Guddiyada Abaabulka ee loo jideeyay in lagu gooyo dhibcaha loo calaameeyay heeraka affarta ah ee qiimaynada guul-gaarista gobolka Minnesota oo idil. Heerarka qiimaynta guul-garista Minnesota waa:

- Ka sarreeya Heerarka Guul-gaarista
- U qalma Heerarka Guul-gaarista
- Qayb ahan u qalma Heerarka Guul-gaarista
- Aan u qalmin Heerarka Guul-gaarista

Aradayda ku guulaysta "U Qalmidda" iyo heerarka "Sarreeya" waxaa loo tixgalinayaa in ay yihiin kuwa ku wanaagsan marka loo eego aqoonta, xirfadaha iyo kartiyada (KSAs) ee lagu sheegay heerarka waxbarashada, ama haddii ay jirto qiimayno baddala, heerarka la ballaariyay ee lagu soo bandhigay qeexitaanada imtixaanka.

Tilmam-bixinada Heerka Guul-gaarista (ALDs) ee qiimaynada Minnesota waxay tilmaam-bixin ka bixisaa heerka-fasalka ardaygu dhiganayo ee ku saabsan waxqabadka midkasta oo ka mida heerarka guul-gaarista. Heerarka waxay muujinayaan hadafyada barayaasha iyo shaqada ardayda oo ku wajahan inta uu socoto waxbarasha sanadeedka. Qiimaynada Minnesota waxaa lagu cabbiraa sida ardaygu ku helayo hadafyadaas, iyo ALDS oo sharraxayso heerka-fasalka ardaygu uu ku dhiganayo heer kasta ee guul-gaarista iyadoo lagu saleynayo wax la mida qiimaynta natiijooyinka. Ardayda ku wanaagsan qiimaynta Minnesota waxaa loo tixgalinayaa in ay yihiin kuwa ku jooga waddada ay guul kaga gaari

karaayaan dugsiga sare dabadiis, iyadoo filashadaan sare ay u duwayso ALDAa si ay u gaaraan waxqabadka ku jira “U-qalmidda” iyo “Sarreynta” heerka guul-gaarka. Ardayda ku wanaagsan halbeggaan waxay ku joogaan jidka ay uga bixi lahaayeen dugsiga sare iyago si fiicanna isugu diyaarinaya wajiga waxbarashaddoda ku sii xiga, tababar ama ku galaan shaqa-bixinta.

Waxaa jira xaddi waxqabad ee ardayga oo u dhigma heerka guul-gaaris kasta ee lagu qeexay ALDs. Sida iyagu ay ugu qoreen tilmaan-bixinada fasal kasta ee heerka guul-gaaris kasta, xubnaha kooxda horumarinta ALDs ay ku saadaaliyeen waqabadka ardayga ku dhaca xaddiga dhexe dhexdiisa. Si loo hanto KSAs oo ka duwaan waxqabadka ardayga kiisa kale, waxaa kaloo loo baahday in maanka lagu hayo xaddiga lagu gudbayo xakabadha hoose iyo kuwoda sare ee heerka guul-garista si heerarka si habboon looga kale garto heerarka dhinac yaalla ku qabsan.

Horumarinta Heerka Tilmaan-bixinada Guul-gaarista

Kooxaxa horumarinta ALD oo ay ku jiraan shaqaalaha Waaxda Waxbarashada Minnesota (MDE) ayna wehliyaan khuburo waxbarasho ee xambaarsan heerarka aqooneed iyo qiimaynta. Kooxuhu waxay arkayeen marka ay u baahdaan talabixinta ay soo jeediyeen barbaariyaasha Minnesota. Ka dib marka kooxuhu ay soo diyaariyaan qormooyinka koobaad (drafts) ee ALDs, qoraallada waxaa loo gudbiyay HumPRO, oo ah urur madaxbannaan si loogu sameeyo dib u eegis. HumPRO waxay qabatay hawl ballaaraan marka la qiimaynayo guul-gaarista iyo iyo tilmaam-bixinada heerka waxqabadka, sidoo kale isku toosinta sheyada imtixaanad heerarka uu ka koobanyahay. Qormada koobaad ee dib loo saxay iyo qiimaynta ALDs iyo HumPRO waxaa ka dib loo bandhigay Guddiga Farsamada La-talinta Minnesota si ay dib ugu saxaan. Haddii loo baahdo, qormada koobaad ee ALDs markale aya lagu sameeynaya dib u eegis si loo raaciyo talooyinka ay soo jeediyeen Guddiga Farsamada La-talinta markale.Tanu waa xogta la adegsaday inta lagu guda jiray habraaca heerka abaabulka.

Iyadoo ALDs ay muhiim u tahay habraaca heerka abaabulka, ayaa kooxaha horumarinta ALD waxay ku tiirsanyihiin sida badan heerarka aqoonta iyo qeexitaanada imtixaanka lagu abuurayo tilmaan-bixinada waxqabadka ardayga. Habraacu su’aala badan oo dhaliil leh ayuu wata:

- Darajadee ardaydu ku helayaan xirfad dheeraada heer kasta oo ka mida heerarka guul-gaarka?
- Waa midkee KSAs ay suurtagal tahay in lagu sifeeyo waxqabadka darajaynta affarta heer dhinac illaa dhinac iyo KSAs aan la samayn karin?
- Waa side, marka la eego qeexitaanada imtixaanka, waxa ardayda ku awoodaan in ay ku muujiyaan xirfaddood dheeraadka KSAs?

Iyadoo maanka lagu hayo su’aalahaan, barbaariyeyaasha ALD mararka qaarkood waxay abuuraan tilmaam-bixino lagu taageeri karo caddeymaha ku jira qorshaha imtixaanka iyo waxqabadka ardayga gobolka oo idil iyo qiimaynada fasalka labadaba. Iyado la fahamsanyahay sida sheyada imtixaanka ay ka soo bixi karaan qaybo xirfad dheerada ee heerarka iyo tixraacyada taasoo aad muhiima ugu habraaca uu abuuray ALDs. Siyaabo kala duwan ayaa loo maareyn karaa sheyada imtixaanka ee ku jira darajada qeexan ama wax aan muuqan oo ay tahay arday kasta in uu la soo baxo, tirade qalabka uu si toosa u haysto ama doorashada taxaddar leh sida ereyda loo xusho, iyo isku toosinta halbeegyada awoodda garashada murugsan. Waxaa kaloo lagama maarmaana in la fahmo sida uu yahay heerka fahamka tafatiran iyo qiyaas qaadashda lagu go’aaminayo xaddiga u gaarsiisanyahya waxay iyagu ku sheegi karaan dhinac kasa heerarka waxqabadyada xiriira. Waaa suurtagal in la kala sooco waxqabadyada affarta heer qiyaas qaadasho badan, laakiin kuwa kale suurtagal ma aha. Tusaale, qiyaas qaadashada qaarkood, waxaan ardayda ka filaynaa in ay ka muujiyaan xirfado sare heerka “U-qalmidda” iyadoo KSAs qiyaas qaadashada aam meesha ka saari doonin tilmaam-bixiyaha “Dheeraadka.” Dhanka kale, qiyaas-qadashada ma bixin doonto lafa ahaanteeda kala soocidyo qumman marka laga eego heerarka waxqabdka. Arrintaan, Qiyaas-qaadashda KSAs waxay u muuqan kartaa heerka “U-qalmidda” keliya, iyagoo ardaydydu aan awoodin in ay wax sameeyaan ama aanay waxba

samayn. Xagga Akhrinta, ALDs waxay ku soo celin kartaa fasallada oo idil taasoo sababi karta imtixaam dheeraada oo adag ee fasallada oo idil iyadoon ku talinayn in dabacsanaan laga muujiyo filashooyinka waxqabadka

Kooxda horumarinta ALD waxay soo saareen qoraalka koobaad intii ay socdeen hawlihii badanaa ee kalfadhiyada Inta lagu jiray kalfdhiyada, kooxdu waxay si joogto ah u soo gudbinayeen heerarka aqooneed iyo qeexitaanada imtixaanka, sida kor lagu soo xusay. Marka laga reebo qiimaynada duwan, kooxuhu sidoo kale waxay ku tiirsanyihiin heerka cabbirka luqadda Webb's Depth of Knowlage si loo qeexo awoodda garashada murugsan. Kooxda ALD waxay shaqada ka bilaabeen heerka fasal kasta iyagoo marka ugu horreeysa qeexaya waxqabadka aqoonta fiican ee Heerrka "Qancinta". Heerka Qancinta wuxuu kala saaryaa waxqabadka qaybahaan aqoonta fiican leh iyo waxqabadka aan aqoonta fiican lahayn. Sababtoo ah ah qiimaynada waxaa lagu beegsaday in lagu kala saaro aqoonta fiican iyo midda aqoonta liidata, waxa jira caddaymo dheetrada ee ku saabsan aqoonta fiican ee ardayga oo lagu muujinayo heerka guul-gaarista. Waxaa kaloo muhiima in la horumariyo tilmaamaha habboon ee heerka "Qancinta" bacdamaa uu dhibaato ku yahay ujeedooyinka la xisaabtanka. Marka la tilmaamo Heerarka "Qancinta," kooxda ALD waxay dareenkooda ku jahaynayaan "Heerarka Siyaadada," ka bacdina hoos loo dhigayo heerka cabbirka "Qayb ahaan Qancinaya" iyo "Aan Qancinayn."

Qormada kowaad ee ALDs ee ka soo baxday kalfadhiyadaan si isadba jooga waxaa dib u eegaya iyo dib u saxaya xeeldheereyaasha qiimaynta MDE si loo hubiyo in ulajeeddada koox kasta iyo sharraxaadda laga bixiyay ay si habboon u muujinayso tilmaan-bixinada. Waxay kalo dib u eegayaan qodobaynta midkasta oo ka mida tilmaan-bixinada herarka guul-gaarista dhinac kasta oo ay wehliso darajooyinka sidoo kale qodobaynta midkasta oo ka mida hdarajooyinka heerarka affarta guul-gaarista dhinac kasta. Si kale haddii loo dhigo, tilmaan-bixinadu ma yihiin waxay ardaydu garanayaan iyo si huffan u kordhiin karaan laga soo bilaabo "Ma yahay mid Aan Qancinayn Heerarka Guul-gaarista" illaa "Ka Sarreeya Heerarka Guul-gaarista" marka darajada loo eego? Iyo tilmaan-bixinada ma yihiin wax ardaydu ay garanayaan iyo ay ku samayn karaan sida heerka "Qancinaya Herarka Guul-gaarista" oo si habboon u kordhinaya darajooyinka dhinac kasta?

Gunaanidda ALDs

ALDs waxaa loo soo qaddimay in lagu tayeeyo guddiga abaabulka si uu noqdo dokumenti siyaasadeed iyadoo la raacayo hawlgalka maareynta ugu horreeya ee qiimaynta cusub. Waa ulajeedooyinka Gobolka in ardayda ku guullaysataan heerka aqoonta fiican ay ku muujin karaan aqoonta, xirfadaha iyo kartiyada lagu sheegay ALDs kaan, iyo ujeeddada laga leeyahay heerarka abaabulka oo aan ahayn in dib loo eego ama dib loo saxo dokumentiga ALD hasayeeshe waxay tahay in la dabbaqo marka go'aanka darajooyinka dhibcaha la goynayo. Guddiga tayaynta abaabulka waxaa laga doonayaa in ay abuuraan wax lagu gudbo ama wax si fudud u qancinaya tilmaam-bixinada laga helay ALDs kaas iyo la dabbaqo waxqabadka ay ku muujiyeen tayada qalabka abaabulka. Tilmaan-bixinada wax yaabaha lagu gudbo iyo lagu soo daro dhibcaha hoose waxay u dhigmaan waxqabadka ugu hooseeya ee la iska doonayo si loo qanciyo filashooyinka heerarka guul-garista ee la haysto Guddiyadu waxay ku taliyeen in aan la samayn isbaddallo macna leh oo ku saabsan waxqabadka tilmaan-bixinada ee heer kasta oo ka mida ALDs inta lagu hawlanyahay abuurista habraraaca looga gudbayo tilmaan-bixinada lagu jaangooynayo dhibaca hoose. ALDs waxaa la soo gabagabeeyay markii Madaxa Waxbarashada uu oggolaaday darajooyinka dhibcihii ay soo jeedisay guddiga tayanta abaabulka.